



## Su'aalo & Jawaabo ku saabsan xiritaanka dugsiyada PPS ee Maajo 8.

Toddobaadkan, waxaanu ogeysiinay qoysaskeena iyo shaqaalaheena in dhammaan dugsiyadeena ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Portland la xiri doono Arbacada, Maajo 8. Si looga soo kabto saacadaha waxbarasho ee la lumiyay, waxaanu go'aansanay in aanu isticmaalno maalinteenu u dambeysay ee la qoondeeyay oo ay noqoto maalinta u dambeysa ee dugsiya, Arbacada, Juun 12.

Halkan waxaa ku qoran jawaabaha ku aadan qaarka mid ah su'aalaha ku saabsan go'aanka:

### **S: Waa maxay sababta loo xiray dugsiyadu?**

J: Maajo 8 waxaa in ay noqoto "Maalinta Waxqabadka" u qoondeeyay Ururka Waxbarashada Oregon taasi oo macallimiinta ka kala socota gobolka oo dhan ay doonayaan in ay u doodaan maalgelin buuxda oo loogu talagalay dugsiya dadweynaha ee K-12.

### **S: Waa maxay sababtu aan dugsiyada loogu furi karin iyada oo la haysto macallimiinta go'aansaday in aysan ka qayb qaadan iyo maamulayaasha?**

J: Iyada oo la eegayo xiriirka aanu la leenahay Ururka Macallimiinta ee Portland iyo maamulayaasheena, waxaanu haysanaa qiyaas ah inta macallin ee maqnaan doonta. Tiradaasi way ka badnaan doontaa awooda aanu u leenahay in aanu si ammaan ah ugu furno isla markaana ku hawlgelino dugsiyadeena.

### **S: Waa maxay sababta maalinta u dambeysa ee dugsiya ay u tahay ilaa Juun 12? Jadwalka degmada ee rasmiga ahaa wuxuu tilmaamayay in Juun 7 ay tahay maalinta u dambeysa.**

J: Jadwalka ayaa loo qoondeeyay Juun 10, 11 iyo 12 in ay noqdaan maalmaha la soo ceshanayo 'makeup'. Degmadu waxay horeba u go'aansatay in ay [isticmaasho Juun 10 iyo 11 si looga soo kabto saacadaha waxbarasho ee la lumiyay](#) ee xiritaanka hawadu/cimilidu keentay ee Febraayo.

### **S: Ka waran ardayda sanadkii u dambeeyay dhigata dugsiya sare? Goorma ayaa maalintooda u dambeysaa ee fasalku noqon doontaa?**

J: Waxaan u wareegaynaa maalinta waxbarasho ee u dambeysa oo loogu talagalay ardayda sanadkii u dambeeyay dhigata dugsiya sare oo ka bilaabmaya Maajo 30 ilaa Maajo 31. Intaasi waxaa dheer, in aanu Guddiga Waxbarashada PPS ka socdan doono in ay ansixiyaan ka dhaafitaan ardayda sanadkii u dambeeyay dhigata dugsiya sare laga fhaafayo in ay buuxiyaan saacadaha waxbarasho ee gobolku waajibaadka ka dhigay ee loogu talagalay ardayda fasallada 12, waxayna u qalin jabin karaan sidii la qorsheeyay, iyada oo [xafladuhu ay bilaabmayaan Juun 2](#).

### **S: Ka waran Dugsiya Bannaanka ee la qorsheeyay Maajo 6-10? Iyo faslaka habeenkii?**

J: Dugsigeena Bannaanku wuxuu sii ahaan doonaa mid furan oo u soconaya si aan kala go' lahayn. Fasallada habeenkii sidoo kale waxay u sii socon doonaan sidii joogtada ahayd ee loo qorsheeyay.

**S: Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu ay ahayd in uu qaato imtixaanka Meelaynta Horumarsan ama Shahaadada Caalamiga ah ee Maajo 8?**

J: Imtixaanka AP iyo IB ee hore loo sii qorsheeyay waxay u sii socon doontaa sidii loo qorsheeyay ee Maajo 8.

**S: Ka waran dhacdooyinka ciyaaraha iyo farshaxanka ee la qorsheeyay in ay dhacaan wakhti dambe fiidkii ama wakhti hore galabtii ee Maajo?**

J: Waxaan ku gudda jirnaa xaqiijinta haddii tartamada iyo dhacdooyinkani ay u sii socon doonaan sidii loo qorsheeyay. Haddii aan u baahano in aan joojino mid ka mid ah, waanu la socon doonaa bulshooyinka dugsiga iyo ka qayb qaatayaasha ay saameysay.

**S: Ka waran daryeelka carruurta ee loogu talagalay qoysaska isticmaala adeegyada PPS? Taasi miyaa weli la heli doonaa Maajo 8?**

J: Waxaan kaa codsanaynaa in aad si toos ah ula xiriirto daryeel bixiyaha carruurtaada si loo go'aamiyo haddii la bixinayo adeegyada Maajo 8.

Haddii aad hayso su'aalo kale, fadlan la xiriir [pubinfo@pps.net](mailto:pubinfo@pps.net).